

Golaha deegaanka, isagoo kaashanaya bulshada xaafada Barton Hill, Redfield and St George ayaa soo saaray soo jeedin lagu soo kordhinayo xaafadda 'East Bristol Liveable Neighbourhood' si fiican la isugu dheelitiro sida dariiqyada ay u isticmaalaan dadka xaafada deggan iyo gawaadhilaydu.

Halwaha maaraynta taraafikada oo ay ku jiraan iridaha basaska, baraha koontaroolka/kala-joojinta gaadiidka iyo dariiqyo hal-dhinac loo maro ayaa la qorsheeyay si looga hortago in darawaliintu sekedaha la deggan yahay dhexmaraan iyagoo fiirsanaya waddada u sahlan. Soo jeedinta maareynta isku-socodka gaadiidka waxaa loo qaabeeyey si dadka loogu sahlo inay ku socdaan, baaskiil ku wataan oo ay gaari curyaanka ku dhex wataan meelaha hawlaha laga qabanayo ee kala duwan.

In kastoo gaadiidka matoorka leh laga mamnuuci doono inay dhex maraan aagga Liveable Neighbourhood, darawaladu waxay weli tagi karaan dhammaan guryaha iyo ganacsiyada iyagoo ka soo gelaya ama ka baxaya meelaha xiriiriya dariiqyada waawayn. Baabuurta adeegyada gurmada waa laga dhaafayaa mamnuucitaanka oo way dhex mari karaan aagga Liveable Neighbourhood. Waxa la filayaa in saxmadda baabuurta ee la dhimay iyo dhaafitaanka loo sameeyay ay sahli doonaan in adeegyada gurmada si fudud oo dhakhso badan ku gaari karaan meelaha ay u socdaan.

Ujeedada Guud ee Xaafadda East Bristol Liveable waa in la yareeyo saxmadda baabuurta matoorka leh, iyo in marka sidaas la sameeyo, la dhimo dikhowga hawada, buuqa iyo shilalka waddada. Taasoo abuuraysa sekedo ama dariiqyo deggan oo aamin ah kuwaas oo dadka deegaanku raaxo ku dareemaan markay ku lugaynayaan, baaskiil ku wataan, ama waxyaabo kale ku wataan xilliyada ay xaafada u kala safrayaan - taas oo u sahlaya in dad badan guryahooda ka baxaan.

Marka laga yimaado tallaabooyinka lagu mamnuucayo baabuurta gudbaysa; sugitaan la'aan xaddidaadyo waqti kasta ah (xariiqaha huruuda ah oo labo ah) ayaa sidoo kale loo soo jeediyay Xaafadda East Bristol Liveable si kor loogu qaado xariiqaha dadka lugaynaya iyo kuwa baabuurta ee isgoysyada iyo meelaha dadku waddada ka gooyaan. Waxay sidoo kale lagama maarmaan u yihiin mamnuucista baabuur dhigashada xannibaadda ah si loo hubiyo in gaadiidku kala socdo khaasatan gaadiidka xaaladaha degdega ah, kuwa qashinka iyo kuwa alaabgeynta.

Golaha deegaanka waxay ula muuqataa inay habboon tahay in la sameeyo amarad isku socodka gaadiidka ee la soo jeediyay -

- si looga hortago khatarta soo gaadhaysa dadka ama baabuurta kale ee isticmaalaysa waddada ama waddo kasta oo kale si looga hortago khatarta khatartan oo kale ku iman karto
- si loo fududeeyo isku socodka gaadiidka iyo dadka (ay ku jiraan kuwa lugaynaya) ee waddada ama waddo kasta oo kale
- si loo ilaaliyo ama loo wanaajiyo bilicda aagga ay waddadu marto
- qiimaynta iyo maaraynta tayada hawada iyadoo la raacayo faqrada (a) ilaa (c) ee qaybhoosaadka (1) ee qaybta 87 ee Xeerka Deegaanka 1995 (tayada hawada)